




Alaamka Qiiqa

Alaamka qiiqa wuxuu ku siinayaa digniin hore ee dabka wuxuuna ku siinayaa waqti aad si nabadgelyo uga baxsato dabka. Waa ka sharci Victoria in ugu yaraan hal alaamka qiiqa lagu xiro dabaq kasta oo guriga ah. Keliya alaamyada qiiqa oo shaqaynaya ayaa nafta badbaadiya.

Haddii uusan alaamka qiiqa ku jirin gurigaaga waxaad 57% inaad lumiso ama uu waxyeeloobo gurigaagu, 26% inuu kugu dhaco dhaawac daran iyo in ka badan afar jeer inaad ku dhimato dabka ka dhaca degaanada marka loo eego dadka haysta alaamka qiiqa oo shaqaynaya.



1. Dhammaan Adeegyada Dabka ee Australia waxay ku talinayaan alaamyada qiiqa oo korontada ku shaqeeya.
2. Alaamyada qiiqa ku xidh saqafka.
3. Ugu yaraan 30cm u jirsii derbiyada.
4. TOBANKII SANOBKA Dhammaan alaamyada qiiqa oo ay ku jiraan kuwa ku xidhan korantada waxay u baahan yihiin in la baddalo.
5. SANNAD KIIBA Baddal batariga ku jira alaamka qiiqa waxaadna si khafiif ah uga tirtirtaa boorka daboolka sare.
6. BISHIIBA Riix batanka tijaabada ee alaamka qiiqa bil kasta waxaadna sugtaa beep, beep beep.

Qorshaha Dab Ka-baxsiga Guriga

Waxaa muhiim ah inaad ogaato waxa la sameeyo haddii dab kaco. Raac tallaabooyinkan si aad u qorshayso sidaad uga baxsan lahayd dabka ka kaca gurigaaga, sidaasna ku tababar qoyskaaga.

Waa inaad hubisaa inaad dibadda uga bixi karto gurigaaga haddii wax degdeg ah dhacaan. Xusuusnow, inaad ka baxsan karin haddii aad isku xirtay (qufushey) albaabkaaga.



1. Hoos isku dhig oo ka bax qiiqa.
2. Haddii ay amaan tahay, albaabada soo xidh si aad u hakiso faafidda dabka iyo qiiqa.
3. Wargeli oo u dig dadka kale markaad ka baxayso guriga.
4. Dibadda u bax dibadana joog.
5. Ku kulma meel amaan ah sida letterbox-ka oo ku yaal dibadda gurigaaga.
6. Ka wac 000 (saddex eber) moobaylka ama taleefanka deriska. Codso DABKA (FIRE).

Jikada iyo Karinta

Wax ku-karinta jikada waa dhaliyaha ugu weyn oo keliya ee dabka guriga. Dabka jikadaada ka dhaca wuxuu keeni karaa waxyeello ballaran. Dababka jikadu waxay masuul ka yihiin dhaawacyada shaqsiyeed oo heer sare ah. ka feejignow jikada.

Dab damiye iyo bustaha dabka waa inay yaalaan meel u dhow hase ahaatee ka durugsan goobta dabka. Gurmadka Dab-demiska Magaalo-weynta (MFB) waxay ku talinayaan inaad keliya isticmaashid Dab damiyeyaal iyo bustaha dabka haddii aad dareemi karto jidh ahaan iyo maskax ahaanba aad awoodo inaad si nabadgelyo ah u isticmaashid qalabkan.



1. Mar kasta la soco carruurta jikada ku jirta. Ka dheere dusha istoofka iyo ofanka. Sidooyinka kirliiyada sii jeedi.
2. Ka dhig dusha istoofka, giriilarka, ofanka, range hood-ka iyo meesha wax lagu kariyo mid ka madaxbanaan xaydh, boor iyo saliid.
3. Joog jikada dhexdeeda marna haka tegin wax karsamaya oo aan lala joogin.
4. Waxyaalaha dabka qabsada sida tuuwalada caleenta shaaha iyo xaashiyaha waa in laga dheereeyaa meesha wax lagu karinayo ama dabka leh.
5. Waa inaad hubisaa qalabyada korantada ee jikada inay nadiif iyo habsami u shaqayn leeyihiin.

Qolka-jiifka

Khatarta dabka waxay ugu weyn tahay habeenkii markii aad hurudo. Markii aan hurudno waxaa naga dhuma dareenkeena urka. Haddii uusan jirin alaamka qiiqa oo shaqaynaya waxaa laga yaabaa inaad toosin ama aad toosto mar dambe si aad si ammaan dabka uga baxsato.

Alaamyada qiiqa waa in lagu xidhaa meelaha dibadda qolalka la jiifsado. Alaamyada qiiqa oo dheeraad ah waa in lagu xidhaa gudaha qolalka halkaas oo qof jiifsado albaabku u xidhan yahay.



1. Sigaar ku cabidda qolka aad bay khatar u tahay. Sigaar haku cabbin qolka jiifka.
2. Hubi inaan qalabka korantada sida timo-qalajiyaha ama timo-toosiyaha iyo laptop-yada aan looga tegin sariirta korkeeda.
3. Daar bustaha korantada 30 daqiiqo ka hor intaadan sariirta tegin waxaadna demisaa markii aad sariirta seexanayso.
4. Ka dhig busteyaasha korantada kuwa fidsan oo kontarooladoodu yaaliin dhinaca sariirta. Si joogto ah u hubi siligyada jaban ama dhamaaday.
5. Xusuusnow, alaamka qiiqa oo dheeraad ah oo qol kasta lagu xidho halkaas oo albaabka la soo xidho marka la hurdo.
6. Keliya soo gado baaggaga kulaylka oo wata tilmaan-bixinta una isticmaal adoo raacaya tilmaan-bixinta soosaaraha.

METROPOLITAN FIRE AND EMERGENCY SERVICES BOARD (MFB)

www.mfb.vic.gov.au

COUNTRY FIRE AUTHORITY (CFA)

www.cfa.vic.gov.au



Kululaynta

Hiitarada waxaa ka mid ah qalabyada ku-shaqeeya korantada iyo gaaska, dabka furan, hiitarka alwaaxa /waxyaalaha sida tartiibta ah u gubtaama hiitarada la qaato oo ay ka midka yihiin kuwa korantada ku shaqeeya , gaaska iyo kirosiinka. Dababka ay dhaliyeen kululayntu waxay kordhaan bilaha qaboobaha (winter).

Dami dhammaan hiitarada la qaato waxaad kaloo demisaa dababka furan ka hor intaadan ka tegin guriga ama aadan seexan.



1. Dharka la qalajinayo iyo waxyaalaha kale waa in laga dheereeyaa ugu yaraan hal mitir in u jirta dhammaan meelaha wax lagu kululeynayo.
2. Hubi in hiitarada ay rakiban yihiin, loo dayactiray loogana shaqeeyo ayadoo la raacayo tilmaan-bixinta soosaaraha.
3. Mar kasta isticmaal shaashadda dabka oo ka horreysa dabka furan.
4. Dhuumaha qiiqa iyo shooladaha waa in la nadiifiyaa
5. Ka dheeree shidaalka iyo waxyaalaha dabk dhaliya ugu yaraan meel u jirta hal mitir dabka.
6. Carruurta joogta meelaha noocyada kululaynta oo dhan waa in lala socdaa. Ilaali masafo amaan ah oo u dhaxaysa carruurta iyo kululaynta.

Korantada

Qalabyada ku shaqeeya korantada oo ay ku jiraan double adaptors, power boards iyo xariga korantada lagu dheereeyo waa dhaliyeyaasha soo-kordhaya ee dababka. Mar kasta raac tilmaan-bixinaha soosaaraha.

Isticmaalka qalabka korantada oo hallaysan wuxuu keeni karaa dab. Keliya isticmaal qalabka sida fiican u shaqaynaya.



1. Isticmaal laambadaha guluubyada waatkoodu hooseeyo.
2. Hubi shaashadaha, laabtoobyada, taleefishinka iyo qalabka kale inay haystaan agagaarkood oo hawadu si fiiican u soo gasho aysan ahayna meel cuyuyuban ama daboolan.
3. Ka demi dhammaan qalabka korantada baraha laga demiyo markii aan la isticmaalayn.
4. Keliya adeegso dadka xirfadaha korantada oo la aqoonsan yahay si ay kuugu dayactiraan qalabyada korada oo hallaysan/waayarada hallaysan.
5. Iska ilaali inaad isticmaasho double adaptors.
6. Adeegso baraha power boards adoo raacaya tilmaan-bixinta soosaaraha, marna ha buux-dhaafin ama si joogto ah u hubi wixii hallaysan.

Holaca Furan

Shamacyada, iyo waxyaalaha saliidda ku shidma waxaa loo isticmaalaa munaasabadaha bulshadeed, dhaqameed iyo diimeed. Waxaa muhiim ah marka la isticmaalayo waxyaalahaas inaad u samayso si amaan ah aadna iskaga ilaaliso in dab ka dhasho meeshaas.

Mar kasta demi sigaarada, shamacyada, iyo waxyaalaha saliidda ku shidma ka hor intaadan ka tegin guriga ama aadan seexan.



1. Daahyada iyo waxyaalaha sida fudud dabka u qabsada mar kasta Ka dheeree dabka holaca furan leh.
2. Waxaad hubisaa in carruurta iyo xayawaanku ay masafo amaan ah u jiraan shamacyada, iyo waxyaalaha saliidda ku shidma.
3. Keliya u isticmaal jiraan shamacyada, iyo waxyaalaha saliidda ku shidma inaad dulsaarto dulaha aan dabku qabsan ama gubi Karin.
4. Isticmaalkadabka holaca furan leh waa in mar kasta lala socdaa.
5. Isticmaal haash-tareeyada dhinacyad dheer leh si aad isaga ilaaliso in wax ka daadaatan mar kastana sigaarada si quman u demi.
6. Saar sigaarada, laytarada iyo kabriidka meel aysan gaarin carruurta.

Loodariga iyo BBQ

Loondariga waxaa yaal alaabada korontada ku shaqaysa sida washin mashiinka iyo qalajiyeyaasha waxaana loo isticmaalaa in lagu kaydiyo alaabo iyo kiimikooyinka nadiif ah.

Mar kasta isha ku hay carruurta ag-joogta BBQ. Khamriga u cab si dhexdhexaad ah haddii aad wax karinayso, si aad naftaada iyo dadka kaleba uga ilaaliso gubashada.



1. Keliya ku isticmaal BBQ dibadda una jirsii masafo hal mitir ah daydka, xerada xoolaha iyo derbiyada.
2. Hubi in hoosku usan howlgab ahayn, xiriiradiisuna ay dhuuqsan yihiin uusan tifiqayn.
3. Hubi in taariikhda la tijaabiyey dhalada gaaska ay tahay mid hadda socota.
4. Nadiifi filtarka dhogorta leh mar kasta oo la isticmaalo.
5. Ka dheeree qalabyada korantada biyaha.
6. Mar kasta u ogolow qalajiyeyaasha dharka inay sameeyaan hal wareeg oo qabowga ah (cool-down) ka hor iontaadan joojin.
7. Saar kiimikada meel aysan gaarin carruurta.

